Daryeelka Allina Partners Care

CADEYNTA HABDHAQANKA:

Allina Health waxa ay daryeel ah samofal siin doontaa dhammaan bukaanka ka soo baxaya tilmaamaha lagu dejiyay habdhaqankan. Habdhaqankan waxa jadiidiyaa Maareeyaha Waaxda Revenue Cycle Support Department ugu yaraan sannadkii mar iyada oo ku saleysan Tilmaamaha Fakhriqa ee Federalka ee sannad walba lagu soo daabacao Diiwaanka Federalka (Federal Registrar). Si iyada oo mas'uuliyad leh loo maamulo maalka Allina Health oo loo siiyo heerka haboon ee gargaarka tirada bukaan ee baahan ee ugu badan, waxa ay Allina dejisay tilmaamaha soo socda oo loogu talogalay bixinta daryeelka samofalka ee bukaanka.

QEEXITAANO:

Daryeelka Allina Partners Care:
Iyado oo loo bixiyay magacyada kala ah Daryeel Samofal (Charity Care), Daryeel Bilaash ah (Free Care), ama Gargaar Dhaqaale (Financial Assistance), waxa lagu qeexay inuu yahay daryeel caafimaad ahaan lagama-maarmaan ah oo ay Allina Healht bixiso kharash la'aan ama kharash la dhimay ku siiso dadka oggol inay lacag bixiyaan laakiin aan lahayn awood ay ku bixiyaan. Adeegyada aanay soo dalacin Allina Health ***uma banaana*** gargaarka dhaqaale ee lagu tilmaamay habdhaqankan.

Daryeelka Waayeelka ee Allina Senior Partners Care:
Oo loogu talogalay qaateyaasha Medicare ee buuxinaya shuruudaha Daryeelka Allina Partners Care ee u baahan gargaar.

Daryeelka iyo Adeegyada Caafimaad Ahaan Lagama-maarmaanka ah:
Daryeelka iyo adeegyada caafimaad ahaan lagama-maarmaanka ah waxa ku jira habraacyada iyo daweynta lagama-maarmaan u ah cilad-sheegid iyo in la bixiyo daweyn ah bogsiin ama xanuun-khafiifin oo ah xaalado jidh ama maskax iyaga oo waafaqsan halbeegyada daryeelka caafimaadka ee xirfad ahaan la aqoonsan yahay. Tusaalooyinka adeegyada caafimaad ahaan lagama-maarmaanka ah waxa ka mid ah: habraacyada bilicda; xadeynta dhalmada; ama daweynta bacriminta ama dhalmo raadinta; habraacyada qalliinka caloosha; adeegyada ilkaha ee aan degdeg ahayn; daryeelka, baadhitaanada, ama daweynta ah tijaabin ama aan hore loogu dhaqmi jirin; qalabka gargaarka maqalka; iyo adeegyada tafaariiqda sida farmasiga, dukaanka muraayadaha indhaha, iyo badi qalabka caafimaadka ee raagaya. Ujeedooyinka habdhaqankan daraadood, waxa Allina Health u dhawrsan xaqa inay go'aamiso, iyada oo ku saleysan kiis

Allina-Wide Policy

walba xaaladdiisa, in daryeelka iyo adeegyadu ka soo baxayaan qeexidda iyo heerka qodobka "caafimaadka ahaan lagama-maarmaan" marka la fiirinayo u-banaanaanta gargaarka dhaqaale.

Allina Health waxa ay cisbitaal kasta ku bixin doontaa liiska adeeg-bixiyeyaasha ee lagu dabbirayo habdhaqankan gargaar dhaqaale. Fadlan fiiri kordhiska E.

Qodobada Codsiga Daryeelka Allina Partners Care:

- Marka codsi dhammeystiran la helo ee la go'aamiyo in dhakhliga guud ee bukaanka ama mas'uulkiisa uu la mid yahay ama ka hooseeyo 275% Tilmaamaha Fakhriga ee Federalka, waxa laga soo qaadi doonaa inuu u banaan yahay Daryeelka Allina Partners Care. Mudada u-banaanaantu waxay socon doontaa illaa 12 bilood laga bilaabo taariikhda aqbalaadda. Qaateyaasha waxa laga rabaa inay soo sheegaan wixii ah isbeddel weyn oo ku dhacay dhakhligooda ama dabbiridda caymiskooda ee saameyn kara u-banaanaantooda barnaamijka.
- Haddii loo aqbalo Daryeelka Allina Partners Care, waxay ay Allina Health tirtiri doontaa baaqiga hadhsan ee ku saabsan kharashyo ka yimid hawlgalo aan doorasho ahayn ee caafimaad ahaan lagama-maarmaan ah.
- Waxa Daryeelka Allina Partners Care loo siin doonaa hab ah gargaar socda kaliya dadka ku nool aagga ay ka adeegaan goobaha Allina Health (MN, FL ama WI).
- Waxa ay Allina Health tixgalinta ku dari doontaa qodobo kale sida macluumaadka maalka ee uu bixiyo bukaanku ee ka qaybqaadan kara go'aanka in la diido ama la aqbalo Daryeelka Allina Partners Care. Go'aanka in la dheereyo Daryeelka Allina Partners Care sababta oo ah xaalado cudur-daar noqon kara waa inuu aqbalo ugu yaraan Maamulaha Waaxda Revenue Cycle Support Department.
- Waxa ay Allina Health ka rabi doontaa shakhsiyaadka inay adeecaan shuruudaha lagu dejiyay Xeerka Daryeel la Iska Bixin Karo (Affordable Care Act) si loo joogteeyo caymiska. Haddii bukaanku leeyahay caymiska koowaad, bukaanku wuxuu u baahan yahay inuu lahaado caymis u-qalmitaanka xarumaha Allina Health si uu u helo kaalmada dhaqaale ee socota.
- Haddii codsi lagu helo gudaha 240 maalmood laga bilaabo taariikhda waraaqda kharashka ee ugu horeysa ee ka dambeysa cisbitaal ka bixista, isla markaana codsadaha laga soo qaado inuu u banaan yahay Daryeelka Allina Partners Care, waxa ay Allina Health dib ugu celin doontaa wixii ah lacag-bixin cisbitaal ee uu qofkaasi bixiyay ee dhaafsan qaddarada guud ee lagu soo dalaco adeegyadaas, oo ah sida la xisaabay iyada oo la raacayo kordhiska F.
- Allina Health ma isticmaali doonto barnaamijyo kombiyuutar oo maleyn ku shaqeeya si bukaanka loogu oggolaado ama loogu diido Daryeelka Allina

Allina-wide Policy

Partners Care. Hal codsi iyo dhammaan dukumentiyada ayaa loo baahan doonaa in laga helo qoyska kasta si loo hawlgalo.

- Codsadeyaasha waxa laga filayaa inay wada-shaqeyn nala sameeyaan oo ay dukumentiyada iyo macluumaadka la weydiistay ku keenaan wakhti haboon. Codsiyada lagama soo qaadi doono inay dhammeystiran yihiin illaa laga helayo dukumentiyada la rabo. Allina Health waxa ay codsadeyaasha u oggoshahay wakhti caqli-gal ah oo ay ku keenaan dukumentiyada taageero ah isla markaana ay kaga jawaabaan weydiisashooyinka ku xiga. Codsi ku jira hakad ama aan dhammeystirnayn waa la joojin doonaa haddii codsaduhu:
    a. Uu ka baaqdo inuu soo celiyo codsiga oo uu la socdo dhammaan dukumentiyada taageero ah gudaha 30 maalmood, ama
    b. Uu ka baaqdo inuu ka jawaabo wixii ah su'aalo iyo weydiisashooyin dheeraad ah gudaha 60 maalmood.

Bukaanka oo la Gaadhsiiyo Barnaamijka Samofalka

Ogeysiiska helitaanka daryeelka samofalka ee Allina Health waxa lagu fidin doonaa habab kala duwan, oo ay ku jiraan, balse aan ku koobnayn:

- Ogeysiisyada oo lagu soo dhajiyo waaxaha cisbitaal dhigitaanka iyo diiwaangalinta, xafiisyada adeegga dhaqaalaha iyo qolalka gargaarka degdegga
- Waraaqaha biilka ee bukaanka oo lagu daro ogeysiis qoran
- Macluumaadka, oo ay ku jiraan habdhaqanada iyo codsiyada barnaamijka Daryeelka Allina Partners Care, oo lagu qoro rugtayada internetka ee dadweynaha, Allinahealth.org

Koobitaanka ku qoran hadal fudud waxa la siin doonaa dhammaan bukaanka inta lagu jiro diiwaangalinta ka dhacda goob cisbitaal ee kasta.

Habdhaqankan, codsiga, iyo koobitaanka ku qoran hadal fudud waxa lagu heli karaa bilaash. Dadku waxa ay dukumentiyadan ku heli karaan hababka soo socda:

- Koobiyo ah waraaq ayaa qofka gacanta laga siin karaa ama bukaanka boosta loogu soo diri karaa haddii uu weydiisto
- Koobiyo ah elegtaroonig ayaa laga heli karaa, laga soo dejin karaa, oo laga daabacan karaa rugta internetka ee Allina Health (www.allinahealth.org/financialassistance)

Allina-wide Policy

- Dukumentiyadan waxa lagu heli karaa luqadaha Ingiriisiga, Soomaali iyo Isbaanish.

Xidhiidhka uu la Leeyahay Habdhaqanada Dayn-ururinta:
Allina Health waxa ay leedahay habraac gooni ah oo ku saabsan kharash dalacidda iyo dayn-ururinta. Si aad u fiirisid koobi ah habraacaas fadlan tag allinahealth.org/billing.

HABRAACYO:

Waajibaad – Waajibaadka la xidhiidha xaqiijinta macluumaadka dhaqaale ee bukaanka, go'aaminta u-banaanaanta iyo isgaadhsiin bukaanka lagala yeesho xaaladdooda aqbalaad ee Daryeelka Allina Partners Care waa hawlgal mideysan oo ka jira gudaha Maamulka Revenue Cycle Management. Habraacan waxa aqbalay Golaha Dhaqaalaha ee Allina Health Finance Council isla markaana wixii ah isbeddelo waaweyn ee ku imanaya habdhaqankan waxa fiirin doona oo aqbali doona golahan.

KORDHISYO:

Kordhiska A: Tilmaamaha Daryeelka Allina Partners Care
Kordhiska B: Codsiga Gargaar Dhaqaale
Kordhiska C: Codsiga Gargaar Dhaqaale oo ah Isbaanish
Kordhiska E1: Liiska Adeeg-bixiyeyaasha uu khuseeyo Daryeelka Allina Partners Care
Kordhiska E2: Liiska adeeg-bixiyeyaasha Aan Ahayn Allina – Daryeelka APC ma khuseeyo
Kordhiska F: Sharaxaad ku saabsan qaddarka caadi ahaan la soo dalaco

Allina-wide Policy